



# U Xir Suunka, Si Fiicana u Duub !

## Talooyin Badbaadada Kursiga Gaariga ee Xiliga Jiilaalka

### Jaakadaha culus ee jiilaalka laguma xidhan karo kursiga gaariga.

Jaakadaha waaweyn waxay adkeeyaan in suunka kursiga gaariga si fiican loo hagaajiyo. Suunka wuxuu u ekaan karaa mid adag, laakiin dharka dheeraadka ah ayaa dabacsanaan muujinaya marka shil dhaco, taasoo ka dhigaysa in suunka furmo.

**Suun furan macnaheedu waa in ilmahaagu uusan ka badbaadi doonin shil dhaca.**



Ha u xiran ilmaha jaakkad, laakiin u xir dhar diiran oo khafiif ah, sida funaanad fleece- ka ah. Haddii ay suurtagal tahay, gaariga sii kululee inta aanad ilmaha aadan saarin.



Ha u xirin jaakkad, laakiin isticmaal buste kadib marka aad suunka xirto, ama dul saar jaakkadda suunka



Jaakkad culus waxay sababysaa in suunka kursiga gaariga uusan si sax ah ugu xirmin taasoo keeni karta dhaawac ama in ilmuu kursiga kasoo baxo haddii shil dhaco.

### Hubi in jaakkadda ilmahaagu ay ku habboon tahay in lagu xirto kursiga gaariga:

1. U xiro jaakkadda ilmahaaga, oo fadhiisi kursiga gaariga, ka dibna xir oo adkee suunka.
2. Adigoon dabcin suunka, fur oo ka saar ilmaha kursiga.
3. Ka siib jaakkadda ilmaha, ka dibna dib ugu xir kursiga gaariga.
4. Adigoon waxba ka beddelin suunka, hubi haddii uu suunku furan yahay. Haddii uu furan yahay, jaakkadda ayaa aad uga dhumuc weyn in lagu xiro kursiga gaariga.